

Xaashida Xaqiiqda ee Ka Hadleysa Hindisaha Kaalmada Biyaha

Waa maxay Hindisaha Kaalmada Biyaha?

Hindisaha Kaalmada Biyaha waxaa heli kara kiraystayaasha guuritaankoodii uu qeybta ka ahaa barnaamijka loogu magac daray Tranche 1 ee dib-u-dhiska saraha dhaadheer. Waxaa loogu talagalay kiraystayaasha u soo guuray guryo bulsho oo gooni ah kuwaas oo ku yaal 33 Alfred Street, North Melbourne, 12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road, Flemington.

Kabitaanku wuxuu kiraystayaasha ka caawin doonaa kharashka biyaha inta lagu jiro 24-ka bilood ee ugu horreeya marka ay u bilaabato heshiiska kirada.

Yaa u qalma?

Kiraystayaashu waa ay u qalmaan haddii ay kasoo guureen 33 Alfred Street, North Melbourne, 12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road, Flemington una soo guureen guri ku yaala Victoria Street, Flemington ama Abbotsford Street, North Melbourne.

Sidee u codsan karaa kaalmadan loogu talagalay inay iga caawiso kharashaadka biyaha?

Kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-rarista ee ka socota Homes Victoria ayaa qaab qoraal iyo taleefanba ah, haddii uu qofku saas doorbidayo, ula soo xiriiri doonto kiraystayaasha u qalma inay codsadaan, si ay ugu sharaxaan qaabka ay u dalban karaan kaalmada biyaha.

Kiraystayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay soo kaxeysan karaan qof taageera markasta oo la wada hadlayo haddii ay rabaan inay sidaas sameeyaan, ama ay codsadaan inaan u diyaarin turjubaan. Turjubaanka aanu diyaarin doono maaha mid uu kireystuhu bixinayo kharashka ku baxaya.

Sidee loo xisaabin doonaa kaalmada biyaha?

Inta ay kaalmadu noqoneyso waa ay ku kala duwanaan doonaan qoys kasta oo u qalma. Waxaa loo xisaabiya:

1. Isku celcelis qiyaasta biyaha loo malaynayo inay isticmaali doonaan muddo 24 bilood ah iyadoo lagu saleynayo inta qof ee uu qoysku ka kooban yahay marka uu u bilaabanayo heshiiska kirada.

2. Intaas ayaa waxaa laga jari doonaa lacagaha biyaha ee kiraystaha lagu soo dalici lahaa muddo 24 bilood ah markay deganaayeen gurigoodii hore ee saraha dheer ah.

Nidaamkani waxa uu hoos u dhigaa doonaa 24-ka bilood ee ugu horeysa kiraysigooda markay saxiixaan heshiiska kirada hoos u dhigayaa kharashka biyaha ee kiraystayaasha u qalma inay codsadaan si kharashkaas uu ula mid noqdo lacagihii biyaha ee ay ka heli lahaayeen markii ay deganaayeen gurigoodii hore ee guryaha dowlada ee saraha dhaadheer ah.

Qaabkeen u helayaa kaalmada biyaha haddii aan u qalmo?

Kiraystayaasha xaq u leh, kaalmada biyaha waxay heli doonaan lacag-bixin hal mar ah taas oo lagu soo shubi doono akoonkaaga bangiga ee aad adigu nala wadaagtay.

Si aad u hesho lacagahaas, fadlan buuxi Foomka Lagu Soo Dalban Karo Kaalmada Biyaha ee ku lifaaqan. Foomkan waa in gacanta lagu saxiixaa ama waa in saxiixu uu noqdaa nooca dhijitaalka ee gacanta lagu qoray.

Fadlan dib ugu soo dir foomka:

- Iimaylka: RelocationsTeam@homes.vic.gov.au ama
- Boostada: Kooxda Dib-u-dejinta, Homes Victoria, 50 Lonsdale Street, Melbourne VIC 3000

Nidaamkani waxa uu ka dhigan yahay in kiraystayaashu aanay sugi doonin inay helaan biilasha biyaha ka hor intaysan helin kaalmadan.

Ka waran haddii lacagaha biyaha ee aan bixiyo ay ka badan yihiin kaalmada aan helay?

Kiraystayaashu waa inay la xiriiraan kooxda dib-u-dejinta ee Homes Victoria haddii ay is leeyihiin lacagaha uga baxay biilasha biyaha 24-ka bilood ee ugu horreeya ee ay deganaayeen guriga cusub waa uu ka badan yahay intii ay bixin jireen markay deganaayeen gurigii hore.

Waxaan kala hadli karnaa kiraystayaasha sida ay Homes Victoria uga dalban karaan in lacagaha dheeraadka loo soo celiyo. Si taasi ay u dhacdo waxaa loo baahan yahay in kiraystayaasha ay keenaan koobiyada biilasha biyaha ee ay heleen 24-kii bilood ee ugu horeeyay markay soo degeen guryaha bulshada ee cusub.

Wax su'aalo ama walaac oo aad qabto majiraan?

Wixii intaas dheer oo macluumaad ah, fadlan kala xiriir Kooxda U Qaabilsan Howlaha Dib-u-dejinta ee Homes Victoria (Homes Victoria Relocation Engagement Team) 0448 795 411 ama ugu dir iimayl RelocationsTeam@homes.vic.gov.au



Somali | Soomaali



Si aad u hesho macluumaad ku qoran luqadaada fadlan iskaan garee QR koodhka ama booqo